Tani ma Maqnaansho Laga cudur tdaartay ama Aan laga cudurdaaran miyaan?

Dugsiyada Dadweynaha Federal Way waxaan rabnaa inaan ku caawino aqoonyahan walba inuu xaadir ku ahaado fasalka, maalin walba, ku faraxsan oo diyaarna u ah inay wax bartaan. Maqnaanshooyinka way badan kartaa oo waxay ku yeelan kartaa saameyno xun aqoonyahanda gaarayo guulaha waxbarashada. Fadlan xaanshidaan tallaada si aad u aqoonsatid waxa ay yihiin maqnaanshaha laga cudur daartay iyo aan laga cudur daaran.

Maqnaashaha Laga cudur daartay

Sida waafaqsan sharciga gobolka Washington, kuwa xiggo ayaa ah cudur daar sax ah oo maqnaanshaha iyo soo daahitaanka:

Howlaha dugsiga uu ansixiyay, sida ku luglahaanshaha ciyaaraha ama farshaxanka, qudbadaha iyo dooda iwm.

Jirooyinka, xaalada caafimaadka ama balanta caafimaadka.

Degdega qoyska waxaa ku jiro laakin kama xadidno, dhimishada ama jirada qoyska.

Diimaha ama ujeedada dhaqanka oo ay ku jiraan dhowrida fasaxa ama waxbarashada.

Maxkamada, dacwada maxkamadeed, howsha maxkamada amartay, ama adeega xeerbeegtida.

Waxbarashada dhaafsan dugsiga sare, dugsiga farsamada ama booqashada barnaamijka ganacsiga, ama wareysiga aqoon yahanka.

Baaritaanka gobolka la aqoonsanyahay iyo howlaha badbaadinta.

Maqnaashaha sida tooska ula xiriiro heerka guri la'aanta ardayga ama daryeelka korinta/ku tiirsanaanta.

Maqnaanshaha la xiriiro howlaha howlgalka shaqo ee waalidka ama masuulka sharciga ah ee ku jiro waajibaadka shaqada.

Maqnaanshaha sababayo tallaabada edbinta/saxitaanka (tusaale ahaan, ka joojinta muddada gaaban ama muddada dheer, ka ceyrinta degdega).

Maqnaanshaha sabab la xiriirto walaacyada badqabka ardayga oo ay ku jiraan maqnaanshooyinka la xiriiro hanjabaadaha, weerarka, ama xoogsheegsiga.

Maqnaanshaha sabab la xiriirto heerka muhaajirka ardayga.

Maamulaha (ama wakiilka) iyo waalidka, masuulka, ama dhalinyarada xorta ah waxay si wadajir ah isugu raaceen howsha la ansixiyay. Maqnaanshaha howlaha waalidka ansixiyay laga yaabo inaan la ansixin haddii ay u keento saameyn xun oo halis ah hormarka waxbarashada ardayga.

Maqnaanshaha sabab la xiriirto ardayga oo aan haysan aaladaha waxbarashada muhiimka u ah ardayga (oo ay ku jiraan helitaanka intarneetka ama qadka).

Maqnaanshaha Laga cudurdaartay inta lagu jiro xiritaanka kulliyada dugsiga degdega ah

Maqnaanshaha la xiriirto jirada ardayga, xaalada caaafimaadka, ama balamaha caafimaadka.

Maqnaanshaha la xiriirto daryeelida xubinta qoyska.

Maqnaanshaha la xiriirto waajibaadyada qoyska ardayga inta lagu jiro waajibaadyada inta lagu jiro saacadaha dugsiga jadwaleysan ee joogtada ah oo si ku meelgaar ah muhiim u ah.

Maqnaanshaha sabab la xiriirto jadwalka shaqada ama waajibaadyada kale ee waaladiinta ardayga inta lagu jiro saacadaha dugsiga jadwaleysan ee joogtada ah, illaa diyaarinada kale laga sameeyo.

Maqnaashaha Aan laga cudur daaran

Ha arkin xaaladaada lagu aqoonsaday liiska? Soo wac dugsigaaga si aad u weydiisid haddii maamulaha ama wakiilka ka cudur daaranayo maqnaanshaha.

Howlaha ay ansixiyeen waalidka/masuulka oo sababayo maqnaanshaha ka badan labo maalmood (maqnaanshaha horay loo diyaariyay), la hubiyo in loo gudbiyo foomka codsiga maqnaanshaha horay loo diyaariyay ugu yaraan sadex maalmood ka hor dhacdada. Foomka Maqnaanshaha Horay loo diyaariyay ee degmada waxaa laga heli karaa: www.fwps.org/Page/581.

Waqtigeeda,

Maalin Walba,

Aqoonyahan Walba waa Muhiim.



FEDERAL WAY
PUBLIC SCHOOLS

Each Scholar:
A voice. A dream.
A **BRIGHT** future.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan maqnaanshaha laga cudur daartay iyo aan laga cudur daaran, fadlan tixraac Xeerarka Maamulka iyo Nidaamyada 3122 iyo 3122P taas oo laga heli karo halkaan: **www.fwps.org/Page/502**